



Sidda Lagu Helo Ogolaansho looga Shaqeyn karo Minnesota

How to Get Permission to Work in Minnesota



Warqadan xogta aruursan ahi waxa ay ka hadashaa sidda lagu helo ogolaansho si looga shaqeeyo Minnesota. Arintan waxaa la yiraa dalbashada “warqad shaqo.” Warqadan xogta aruursan ahi waxa ay kuu sheegtaa:

- Cidda sidda Sharciga ah uga shaqeysan karta Minnesota
- Waxa loo ogol yahay shaqooyinku inay wax kaa waydiin karaan
- Talaabooyinka lagu codsado ruqso shaqo
- Talooyin ku saabsan buuxinta foomka warqadda shaqadda

Si aad u akhrido warqadan xoga aruursan Afaf kale ah, booqo: LawHelpMN.org



Warqadan xogta aruursan ah waxaa sameeyey iskaashiyo dhexmaray hay'adaha Immigrant Law Center of Minnesota, Mid-Minnesota Legal Aid, Southern Minnesota Regional Legal Services, The Advocates for Human Rights, iyo the Volunteer Lawyers Network. Waxaana gargaaray maalgeliyey laga helay Waaxda Adeegyadda Bulshadda ee Gobolka Minnesota (State of Minnesota Department of Human Services).

Cidee Shaqeyn karta

Ma ka shaqeyn karaa Minnesota?

Haddii aadan ahayn muwaadin Mareykan ah (U.S.), waxa aad u baahan tahay ogolaansho dowladda inaad ka hesho si aad si sharci ah ugu shaqeyso ganacsi ama qofka kale. Waxa aad dalbsan “warqad shaqo” adigoo isticmaala Foomka I-765. Haddii aad shaqeyso ogolaansho la’aan, waxa ay taasi waxyeeli kartaa dacwadaadda laanta socdaalka (immigration).



Ma u baahnahay warqad shaqo si aan u bilaabo ganacsi?

May. Uma baahnid warqad shaqo ama lambar sooshal sakuurati si aad uga bilowdo ganacsi Minnesota. Laakiin iyadoo hadba ku xiran nooca ganacsigu uu yahay, waxaa dhici karta inaad u baahato inaad dalbato laysin gaar ah si aad cunto uga shaqeyso ama aad u isticmaasho qalabka qaarkii. Uma baahnid laysin si aad u bilowdo dhamaan ganacsiyada oo dhan. Tusaale ahaan, una baahnid laysin si aad u bilowdo ganacsi wax nadiifin ah.

Cid walbaa ma dalban kartaa warqada shaqada?

MAYA. Si aad u dalbato warqad shaqo, waa khasab inaad:

- **Jaa leedahay wuxuun sharci ah.** Tusaale ahaan: waa aad dalban kartaa warqad shaqo haddii aad tahay qaxooti ama lagu siiyey magangelyo. [AMA](#)
- **Codsi uu kuu xareysan yahay.** Tusaale ahaan: waxa aad codsan kartaa warqad shaqo haddii codsi magangelyo ah ama mid deganaansho rasmi ahi (green card) uu kuu xareysan yahay.

Shaqadaydu ma i waydiinsan kartaa inay arkaan cadeyn ah in la ii ogol yahay inaan shaqeyn karo?

Haa. Shaqooyinku kaliya waxa ay shaqo qori karaan dadka haysta ogolaansho ay ku shaqeyn karaan. Sharciga ayaa dhigaya inay khasab ku tahay shaqooyinku inay hubiyaan aqoonsiga iyo xaq u yeeladka shaqo ee qof walba oo ay rabaan inay shaqo qoraan. Tani waa mid quseeysa cid walba, ee kaliya ma quseeyso muhaajiriinta. Shaqaalahu waa khasab inay buuxiyaan Foomka I-9 si ay u cadeeyaan cidda ay yihiin iyo in loo ogol yahay inay shaqeyn karaan.


Dukumiintiyaddee ayey shaqaddu i waydiin doontaa inaad tuso?

Shaqooyinku waxa ay waydiistaan shaqaalaha oo dhan inay ku buuxiyaan Foomka I-9, 3 cisho gudahood kolka ay shaqadda bilaabaan. Waa khasab inaad tusto shaqadda dukumiintiyada si aad u cadeeyso inaad haysato ogolaansho ah inaad shaqeyn karto. Foomka I-9 waxa uu leeyahay liis ah dukumiintiyada la isticmaali karo si loo cadeeyo cidda aad tahay iyo xaq u yeeladka inaad shaqeyso ah.

Maxaan sameeyaa haddii shaqadaydu ay i waydiiso inaan buuxiyo Foomka I-9?

Haddii shaqo ay ku waydiisato inaad buuxiso Foomka I-9, waa khasab inaad sameeyso.

- HA oran waxa aad ahayn muwaadin Mareykan (U.S.) ah haddii aadan ahayn.
- HA isticmaalin magac, dukumiinti, ama lambar Sooshal Sakuurati oo aan jirin.
- HA u isticmaalin akhbaar qof kale leeyahay Foomka I -9. Tan waxaa laga yaabaa inay kaa hor istaagto inaad waligaa ka qaadato sharci deganaansho rasmi ah Mareykanka (U.S.).
- Kolka aad buuxiso Foomka I-9, waxa aad ka xulan kartaa liiska dukumiintiyada aad tusayso shaqada. Shaqadaadu kumaga amri karto inaad tusto 1 dukumiinti oo khaas ah.



Tusaale ahaan: Foomka I-9 ee Daahir

Daahir waxa uu u buuxiyey Foomka I-9 shaqadiisa cusub. Waxa uu tusay shaqadda dukumiintiga ah warqadiisa shaqada si uu u cadeeyo inuu xaq u leeyahay inuu shaqeeyo. Qoladda shaqadiisa ayaa u sheegtay inuusan isticmaali karin dukumiintigaas. Shaqaddu waxa ay tiri Daahir waa khasab inuu keeno sharci deganaansho rasmi ah (green card) haddii uu doonayo inuu shaqeeyo. **Waa sharci-darro in qolo shaqo ay saa sameeyso.** Daahir waa inuu la tashadaa qareen kolkaa.

Ma u diri shaqaddu akhbaartayda laanta socdaalka (immigration)?

May. Laakiin shaqaddu waa khasab inay hayso Foomkaaga I-9. Waa khasab inay tusaan dowladda, haddii ay codsato inay aragto. Haddii shaqadaaddu ay isticmaasho waxa la yiraa E-Verify, akhbaarta waxaa laga wadaagaa Wasaaradda Amniga Qaranka.

Ma u baahnahay inaan cusboonaysiiyo warqadayda shaqadda?

Isticmaal isla talaabooyin si aad u codsado marka ugu horeeysa ama aad u cusboonaysiiyo codsigaaga. Ka eeg “Talaabooyinka lagu Codsado” iyo Sidda loo Buuxiyo Foomka I-765” ee qaybaha warqadan xogta aruursan ah si aad caawimaad uga hesho. **Waa inaad codsato inaad cusboonaysiiso warqadaadda shaqada ugu yaraan 180 cisho ka hor inta aysan dhicin.** La tasho qareen ka hor inta aadan cusboonaysiin warqadda shaqada haddii:

- Warqadaadda shaqada ee iminka ay jaa dhacday.
- Warqadaadda shaqada ee iminku ay dhici doonto muddo ka yar 180 cisho.
- Haddii lagugu helay dambi ka dib codsigaaga warqadda shaqada ee ugu horeeyey.



Talaabooyinka lagu Codsado

Sidda lagu codsado warqad shaqo?

Waxaa jira 4 talaabo oo lagu codsado warqad shaqo.



Talaabadda 1

Buuxinta Foomka I-765.

Gal barta uscis.gov/i-765 ama mari koodka QR (QR code) si aad u hesho daabicaadii ugu dambaysay ee foomka. **Waa khasab**

inaad buuxiso daabacadii ugu dambaysay ee foomka. Hay'ada USCIS ma ay aqbali codsigaaga haddii aad isticmaasho foomkii hore. Daabacaada foomku waxa ay ku qoran tahay geeska hoose ee bidix ee bog walba. Tusaale ahaan: Waxa ay oran kartaa, "Daabacaadda 08/28/24". Waxaa jira tilmaamo ku saaban "Sidda loo Buuxiyo Foomka I-765" oo ku jira warqadan xogta aruursan.



Talaabadda 2

Soo aruuri dukumiintiyada lala dirayo codsigaaga.

La dir 5 waxyaabood codsigaaga warqadda shaqada:

- Foomka I-765 oo Buuxsan.**
- Nuqul ah 1 dukumiinti oo ku cadeynaya adiga.**

Dukumiintigu waa khasab inay bixisay dowladda United States ama wadan kale dowladdii. Haddii dukumiintu uusan Ingiriis ahayn, waa khasab inaad turjunto. Tusaalooyin dukumiintiyada waxaa ku jira:

 - Warqad shaqo oo hore haddii aad cusboonaysiinayso codsigaaga.
 - Dal-ku-gal (passport) leh sawirkaaga, magacaaga iyo taariikhdaada dhalashada
 - Warqad dhalasho hadii ay leedahay sawirkaaga. **AMA** warqad dhalasho **IYO** Aqoonsi (ID) sawir leh
 - Fiise (Visa) ay bixisay qunsiliyad ajnabi ah
 - Dukumiinti Aqoonsi (ID) ah oo heer qaran ah oo sawir leh iyo/ama faro la qaaday leh.
- Nuqul ah 1 dukumiinti oo cadeynaya sharcigaaga laanta socdaalka/xaq u yeeladka inaad shaqeyso.** Tusaalayaasha dukumiintiyadda la aqbali karo waxaa ku jira:
 - Diiwaanka Gelitaanka-Bixitaanka ee I-94
 - Go'aan uu soo saaray Xaakim laanta socdaalka (immigration) ka tirsan
 - Go'aan USCIS ay gaarto sidda magengelyo ama VAWA
 - Rasiid ogaysiis ah oo muujinaya in codsi sharci ku uxareysan yahay
- Labo sawir oo kuwa dal-ku-gal ah (passport) oo 2-hiish x 2-hiish ah.** Waxa aad isaga qaadi kartaa sawirada dal-ku-gal ah dukaamada sida CVS ama Wal-Mart.

- **Khidmad AMA codsiga saamixida khidmada (HADII loo baahdo).** Gal uscis.gov/feecalculator si aad eegto in lagaa rabo inaad bixiso khidmad si aad u codsato. Dhamaan codsiyada oo dhama uma baahna in khidmad la bixiyo.
 - Haddii khidmad la iska rabo, buuxi foom si aad ugu bixiso kaar amaah ama mid bangi. ([credit or debit card](#)) ama adigoo isticmaalaya akhbaarta akoonka ee bangigaaga ([bank account's financial information](#)). Waxa aad isticmaali kartaa kaarka qadimaadda ah si aad ugu bixiso khidmadahaaga. Kuma aad bixin kartid, lacagta idman (money order) ama lacag cadaan.
 - Haddii aadan awoodin inaad bixiso khidmada, dalbo khidmad saamixid. Qaar ka mid khidmadaha lama saamixi karo. Barta LawHelpMN ee shabakada (website) waxa ay haysaa xog aruursan oo ku saabsan sidda lagu dalbado khidmad saamixida. Gal: lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/immigration-fee-waivers-0.



Talaabadda 3

Nuqul ka Sameyso codsigaaga.

Nuqul ka sameyso Foomkaaga I-765 iyo dukumiintiyadda aad la dirayso codsiga. Nuqul naftaadda ula har si aad u haysato.



Talaabadda 4

U dir codsigaaga hay'ada Muwaadinka iyo Adeegyadda Laanta Socdaalka ee (USCIS).

- Boostadda ugu dir codsiga adigoo ku hagaajinaya ciwaanka ku haboon nooca xaq u yeeladkaaga. Noocaaga xaq u yeeladku waxa uu ku hoos jiraa su'aasha 27 qaybta 2 ee Foomka I-765. Gal barta uscis.gov/i-765-addresses si aad u hesho ciwaanka boostada.
- U sheeg Xafiiska Boostadda inaad u baahan tahay inaad la socoto codsigaaga kolka aad dirto. Ka gado la socod Xafiiska Boostadda si kolkaa aad u ogaato kolka codsigaagu la geeyo meeshii loogu talagalay. Hubi inaad hesho cadeyn ama rasiid kolka la geeyo.



Waa aad ku dalban kartaa warqad shaqo khadka.

Haddii aad rabto waa aad ka buuxin kartaa codsigaaga warqadda shaqadda khadka. Codsigu waxa uu la mid yahay sidda kan boostadda lagu diro. Waa inaad buuxiso Foomka I-765 aadna ku dirto kumbuyuutarka iyadoo ay weheliyaan isla dukumiintiyadda gargaaraya. Mari QR (QR code) ama gal: uscis.gov/i-765.



Haddii aad ku buuxiso codsiga khadka (online) ka waa khasab inaad:

- Ka sameyso akoon shabakadda (website) hay'ada USCIS
- Ogsoonow noocaaga laanta socdaalka ka hor inta aadan bilaabin waxba.
- Ogsoonow sidda aad ku soo gashay wadanka Mareykanka (U.S.)
- Ogsoonow sharciga iminka wadanka aad ku joogto
- Awood inaad mariso (scan) aadna geliso kumbuyuutarka lifaaqyada
- Awood inaad daabacdo qayb codsiga ah. Haddii uu qof kaa caawiyey buuxinta Foomka I-765, waxa ay u baahan yahay inuu saxiixo oraah.

Haddii aadan haysan kumbuyuutar, waxa aad ka heli kartaa goob gargaarka dhanka sharci ah oo bilaash ah barta: legalkiosk.org/locations. Qaar badan oo ka mid ah maktabadahu (libraries) waxa ay leeyihiin kumbuyuutaro ay dadku bilaash ku isticmaali karaan.

Sidda lagu Buuxiyo Foomka I-765

Akhbaarta Guud

- Tilmaamaha warqadan xogta aruursan ahi waxa ay ku salaysan yihiin “Daabacaadda 08/28/24” ee Foomka I-765. Waxaa jira tilmaamo kale oo ku jira mareegta uscis.gov/sites/default/files/document/forms/i-765instr.pdf Ku taab garee jawaabahaaga ama ku qor adigoo khad madow adeegsanaya.
- Ha isticmaalin magac been ah hana ku qoran wax akhbaar ah oo been ah foomka.
- Haddii wax foomka ku qoran aysan ku quseeyn, ku qor goobta “N/A” (Ima quseeyso).
- Haddii aad u baahan tahay goob kale si aad ugu qorto jawaabtaada, isticmaal “Qaybta 6: Akhbaar Kale.”

Qaybta 1. Sababta Codsiga

Qaybta 1 waxay leedahay 1 su'aal. Dooro jawaabta ku haboon sababta aad u codsanayso warqada shaqada. La bax 1 jawaab.

- **Haddii aad dalbanayso markii ugu horeeysay,** calaamadi santuukha 1a.
- **Haddii aad bedelayso dukumiinti lumay,** calaamadi santuukha 1b.
- **Haddii aad cusboonaysiinayso,** calaamadi santuukha 1c.



Sidda Su'aashani ay uga Muuqan doonto Foomka

Part 1. Reason for Applying

I am applying for (select only one box):

- 1.a. Initial permission to accept employment.
- 1.b. Replacement of lost, stolen, or damaged employment authorization document, or correction of my employment authorization document **NOT DUE** to U.S. Citizenship and Immigration Services (USCIS) error.
- NOTE:** Replacement (correction) of an employment authorization document due to USCIS error does not require a new Form I-765 and filing fee. Refer to **Replacement for Card Error** in the **What is the Filing Fee** section of the Form I-765 Instructions for further details.
- 1.c. Renewal of my permission to accept employment. (Attach a copy of your previous employment authorization document.)

Haddii aad calaamadisay santuukha 1b ama santuukga 1c laguguna helay wax dambi ah ka dib markii ugu horeeysay ee lagu ogolaaday inaad shaqeyso, la tasho qareen ka hor inta aadan codsan.

Qaybta 2. Akhbaarta Adiga ku Saabsan

Qaybtan waxa ay leedahay 31 su'aalood oo ku saabsan adigu qofka aad tahay, sidida aad ku soo gashay wadanka (U.S.), sharcigaaga iminka ee wadanka. Warqadan xogta aruursan ah waxa ay bixisaa talooyin ku saabsan sidida loo buuxiyo **qaar** ka mid ah su'aalaha ad-adag. Hubi inaad akhrido aadna ka jawaabto **dhamaan** su'aalaha qaybta 2 ee Foomka I-765.

- **Su'aasha 1a (Magaca Qoyska).** Haddii aad leedahay 2 magac oo awoowe, ku qor labada magac ee awoowaba santuukha Magaca Qoyska.
- **Su'aasha 9 (Lambarka Akoonka USCIS).** Lambarkaaga akoonka USCIS ku waa uu ka duwan yahay Lambarkaaga-A (A-Number).
 - **Haddii aad xareysatay codsi ama dalab adigoo adeegsanaya habka khadka ee USCIS ka.** Waxa aad leedahay akoon lambar. Si aad u hesho akoon lambarkaaga, gal akoonkaaga ka dibna tag bogga akhbaarta (profile).
 - **Haddii aad ka xareysatay codsi ama dalab qaab xaashi ah iyadoo la gelinayo santuukh ay leedahay hay'ada,** waxa aad leedahay akoon lambar. Waxa ay ku taal Ogaysiiskaaga Gelida.
 - **Haddii aadan ku lahayn akoon lambar oo khadka ah hay'ada USCIS** ku qor "N/A" halkan.
- **Su'aasha 11 (Xaaladda Guur).** Haddii guurkaaga aysan aqoonsanayn dowladdu ama habka cadaaladda ee meesha aad ku guursatay, ha ku jawaabin, "Guur."
- **Su'aalaha 13a, 14, iyo 15 (Lambarka Sooshal Sakuuratiga).** Haddii aadan haysan lambar Sooshal Sakuurati, waxa aad la dalban kartaa mid foomkan. Haddii aad rabto lambar Sooshal Sakuurati ah, uga jawaab 'haa' su'aalaha 14 iyo 15.



Sidda Su'aashani ay uga Muuqan doonto

13.a. Has the Social Security Administration (SSA) ever officially issued a Social Security card to you?
 Yes No

NOTE: If you answered "No" to **Item Number 13.a.**, skip to **Item Number 14.** If you answered "Yes" to **Item Number 13.a.**, provide the information requested in **Item Number 13.b.**

14. Do you want the SSA to issue you a Social Security card? (You must also answer "Yes" to **Item Number 15., Consent for Disclosure**, to receive a card.)
 Yes No

NOTE: If you answered "No" to **Item Number 14.**, skip to **Part 2., Item Number 18.a.** If you answered "Yes" to **Item Number 14.**, you must also answer "Yes" to **Item Number 15.**

15. Consent for Disclosure: I authorize disclosure of information from this application to the SSA as required for the purpose of assigning me an SSN and issuing me a Social Security card.
 Yes No

NOTE: If you answered "Yes" to **Item Numbers 14. - 15.**, provide the information requested in **Item Numbers 16.a. - 17.b.**

- **Su'aalaha 21a (Foomka 1-94 ee Lambarka Diiwaanka Imaanshaha-Bixitaanka).**
Markii lagu ogolaaday gelida wadanka U.S., hay'adda Kastanka iyo Ilaalinta Xuduudku (Customs and Border Protection) ee (CBP) waxaa dhici karta inay ku siisay adiga Foomka I-94. Foomkan waxa uu leeyahay Lambarka Diiwaanka Imaanshaha-Bixitaanka. Si aad u hesho nuqul ah Foomkaaga I-94:
 - **Haddii aad ka soo gashay wadanka U.S. dekad ama garoon diyaaradeed ka dib bishii April 30, 2013** gal barta: cbp.gov/i94 **AMA**
 - **Xareyso Foomka I-102** (Codsiga Bedelida/diiwaanka Hore ee Imaanshaha-Bixitaanka ee Dadka aan wadanka u soo guurin). Ka hel Foomka I-102 barta ah: uscis.gov/i-102
- **Su'aasha 21b [Lambarka Dal-kugalkii (Passport) ugu Dambeeyey ee lagu Siiyey].**
Haddii aad isticmaashay dal-ku-gal ama dukumiinti socdaal si aad ugu socdaasho wadanka U.S., lambarkaa halkan ku qor. Haddii aadan ula socdaalin U.S., 1 mid ah oo dukumiintiyadaa ah, ku qor "N/A."



- **Su'aasha 27 (Nooca Xaq uyeeladka). Tani waa su'aasha ugu muhiimsan Foomka I-765.**
Haddii aad ku qorto nooc khalad ah, codsigaaga waa la diidi. Isticmaal jaantuska hoose si aad u xulato nooca. **Haddii aadan aqoon noocaaga, la tasho qareen.**



Sidda Su'aashani ay uga Muuqan doonto Foomka

Information About Your Eligibility Category

27. Eligibility Category. Refer to the **Who May File Form I-765** section of the Form I-765 Instructions to determine the appropriate eligibility category for this application. Enter the appropriate letter and number for your eligibility category below (for example, (a)(8), (c)(17)(iii)).

() () ()

Waa khasab inaad jaa haysato wuxuun sharci (immigration) ah **AMA** codsi laanta socdaalka ah (immigration) kaaga xareysan si aad u dalbato warqad shaqo. **HA dalbanin warqad shaqo haddii noocyadaa midna uusan waafaqsanayn sharcigaaga.**

Noocyadda Sharciga 1 kee jawaabaha ka mid ah ayaa adiga ku tilmaama?	Nooca Ku qor koodkan 3-tiro ah su'aasha 27.
Qaxooti	A03
Magangelyo codsade (Magangeliyo hele)	A05
Laga reebay saarid	A10
T-1 dadka aan daganaashaha rasmiga ah aan haysan (nonimmigrant)	A16
Ehel la ah qof haysta sharciga T-1 ee dadka aan deganaanshaha rasmiga ah haysan (nonimmigrant) ay haystaan	C25

Noocyadda Sharciga 1 kee jawaabaha ka mid ah ayaa adiga ku tilmaama?	Nooca Ku qor koodkan 3-tiro ah su'aasha 27.
Sharciga U-1 ee dadka deganaashaha rasmiga ah aan haysan (nonimmigrant)	A19
Ehel la ah qof haysta sharciga U-1 ee aan dagaanshaha rasamiga ahayn	A20
Codsi magangelyo u xareysan yahay	C08
Codsi degaansho rasmi ah (green card) u xareysan yahay	C09
Saarid ka baajini u xareysan tahay	C10
Loo sii daayey maslaxa umadda awgeed	C11
Fal dib looga dhigay	C14
Amar kormeerid/CAT	C18
VAWA iskii-u-codsade	C31
DACA. HA KU CODSAN FOOMKA I-765	C33

- **Su'aasha 30 ((c)(8) Nooca Xaq u Yeeladka).** Ka jawaab su'aashan haddii aad leedahay codsi magangelyo oo kuu xareysan aadna uga jawaabtay "C08" su'aasha 27. Haddii aadan lahayn codsi magangelyo oo kuu xareysan, ha ka jawaabin su'aashan.

Qaybta 3. Oraahda Codsadaha, Akhbaarta la soo Xiriirida, Shaac ka Qaadida, Sugidda, iyo Saxiixa

Saxiix oraahda si aad u cadeyso in waxa aad ku qortay foomku ay sax yihiin. Ku qor ciwaanka iyo telefanka ay hay'adda USCIS ku ay kaa heli karto.

Qaybta 4. Akhbaarta la Soo Xiriirida ee Turjubaanka, Sugida, iyo Saxiixa

Turjubaan ma kaa caawiyey buuxinta foomka?

- **Haddii aad haa tiri,** qor magaciisa iyo akhbaartiisa la soo xiriirka. Waa khasab inuu saxiixo foomka.
- **Haddii aad maya tiri,** ka bood su'aalahan.

Qaybta 5. Akhbabarta la soo Xiriirida, Shaac ka Qaadida, iyo Saxiixa Qofka Diyaarinaya Codsigan, Haddii uu yahay Qof Kale oo Aan Ka ahayn Codsadaha

“Diyaariye” waa cid walba oo kaa caawisay buuxinta foomka. Kuwaasi waxay noqon karaa qof ehel ah, saaxiib, ama qareen. Ciddi ma kaa caawisay buuxinta foomkan?

- **Haddii aad haa tiri**, qor magaciisa iyo akhbaartiisa la soo xiriirka. Waa khasab inu saxiixo qofkaasi foomka.
- **Haddii aad maya tiri**, ka bood su’aalahan.

Xog aruursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga ee MA AHA talo xagga sharciga ah. La tasho qareen. Ha isticmaalin warqada xogta aruursan ah haddii ay soo wareegtay 1 sanno xilligii la daabacay. Waydiiso xogtii ugu dabmabysa, liiska warqada xogta aruursan, ama aad ku hesho qaabab kale.

© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.